# Rabshadaha Qoyska

Xarumaha laga helo Caawimaada
Waa maxay rabshadaha qoyska?
Caawimaada loogu talagalay dadka rabshada geysta
Carruurta
Xadgudubka galmada
Xaquuqda deganaashaha
Dandaansiga
Guurka Qasabka ah iyo Gudniinka gabdhaha

# Xarumaha laga helo Caawimaada

Qalalaasaha Qoyska (Häusliche Gewalt) waa is gacan qaadka dhex maro Reeraha iyo lamaanaha. Waa muhiim inaad doonato caawimaad hadii aad la kulanto Rabshadaha noocan ah. Xarumo kala duwan ayaa bixiyo wacyigelin, la talin iyo garab istaag ku saabsan arimahan. Sida caadiga ah kulamada xarumahan waa qarsoodi hadii loo baahdana waxaa lagu qabanayaa turjumaan waliba inta badan waa bilaash. Goobaha hoos ku xusan waxaad ka heli kartaa kaalmo.

## Xaaladaha degdega ah

Halkan waxaad ka helaysaa Xog dheeri ah oo laxiriirta goobaha laga helo Gargaarka xaaladaha Degdega ah:

- Booliska 112 / Ambalaasta: 144
- Gabaadka, wacyigelinta iyo Hoyga haweenka sita caruurta ama aan sidan: Frauenhaus beider Basel (24/7), 061 681 66 33, www.frauenhaus-basel.ch
- Gabaadka, wacyigelinta iyo Hoyga haweenka sita caruurta ama aan sidan: Guryaha Haweenka iyo caruurta (24/7), 061 302 85 15, https://wohnen-frauen-kinder.heilsarmee.ch (DE)
- Kaalmada daawooyinka dumarka: Gargaarka degdega ah ee isbitaalka jaamacada qeybta haweenka (24/7), 061 328 75 00, www.unispital-basel.ch/frauenklinik
- Kaalmada daawooyinka ee dhallaanka, caruurta iyo dhalinyarada: Universitäts-Kinderspital beider Basel Notfall (24/7), 061 704 12 12, www.ukbb.ch
- Kaamlada Dawooyinka: Universitätsspital Basel Notfallzentrum (24/7), 061 265 25 25, www.unispital-basel.ch/notfallzentrum
- Xakameyaha Xaaladaha adag, Kaalmada dhibaatoyinka maskaxeed: Universitäre Psychiatrische Kliniken Basel Notfall (24/7), 061 325 51 00, www.upk.chwww.upk.chwww.upk.chwww.upk.chwww.upk.chwww.upk.chwww.upk.chwww.upk.chwww.upk.chwww.upk.ch

## Talobixin

Waa Qarsoodi iyo bilaash. In laguu helo turjumaan waa macquul.

- Talo, garab istaag iyo taageero dhaqaale ee haweenka, ragga, caruurta iyo dhalinyarada: Caawiyaha dhibanaha ee labada Basel, 061 205 09 10, www.opferhilfe-beiderbasel.ch
- Kahortaga xaaladaha adag iyo talooyin: Xafiiska Arimaha Bulshada ee Booliska Gobolka (Fachstelle für Häusliche Gewalt der Kantonspolizei), 061 267 70 38
- Talooyinka Khamrada iyo dhibaatoyinka Balwadaha: Waaxda Caafimaadka qaybta Balwadaha, 061 267 89 00, www.sucht.bs.ch (DE)
- Talooyinka dhibaatoyinka balwadaha oo luqado kala duwan ah: Multikulturelle Suchtberatungsstelle MUSUB, 061 273 83 05, www.mituns.ch
- Talo qarsoodi ah (teleefoon, qaab online ah iyo I-Maayl): Dargebotene Hand (24/7), Tel. 143, www.143.ch
- Talo iyo taageerada Waalidka, Qoysaska iyo dadka mas'uulka ah: Elternnotruf (24/7), 0848 35 45 55 (Festnetztarif), www.elternnotruf.ch
- Latalinta talo ragga talo doonka ah: Xafiiska Ragga ee deegaanka Basel, 061 691 02 02, www.mbrb.ch (DE) Qiimaha talooyinka waxay ku xirantahay dhaqaalaha ay awoodi karaan dadka talo raadiska ah.

## Carruurta iyo dhalinyarada

Carruurta iyo dhalinyarada ay haysato xaalado adag oo qoyska ah waxay wici karaan habeen iyo maalinba Pro Juventute si ay ula hadlaan. Waxay kula xariiri karaan taleefoon, wada sheekeysi, fariin qoraal ama iimayl.

- Talobixinta qarsoodiga ah ee Caruurta iyo dhalinyarada (waxaa lagula xiriiri karaa (qadka teleefoonka, wada sheekeysi, fariin qoraal iyo I-Meeyl): Pro Juventute: Waa tallo bilaash ah oo ah qarsoodi 24/7, taleefoonka. 147, www.147.ch

## Kaalmo Caafimaad iyo Raad raaca

Xadgudubyada Jirka ama galmada waxaa lagu dhiirigeliyaa in sida ugu dhaqsaha badan dhaqtar u baaro. Baaritaanka waa mid qarsoodi ah. Booliska waxa lala socodsiinayaa kaliya haddii dhibanahu raali ka yahay.
Isbitaalka Jaamacada ee Basel waxuu u gaar yahay dhaawacyada iyo raadraaca ka dhasha xadgudubyada jirka iyo galmada. Hadaba qofkii u taga dhaqaatir kale waa inuu ka codsadaa inay raadadka xadgudubyada si wacan u diiwaangeliyaan.

- Haweenka: Isbitaalka Jaamacada Qeybta Haweenka ee xaaladaha degdega ah (24/7), 061 328 75 00, www.unispital-basel.ch/frauenklinik, Spitalstrasse 21
- Ragga: Isbitaalka Jaamacada Basel Qeybta xaaladaha degdega ah (24/7), 061 265 25 25, www.unispital-basel.ch/notfallzentrum
- Dhaqtarka guriga ama isbitaalada qaybta xaaladaha degdega ah ee kuugu dhow
- Caawiyaha Dhibanaha ee labada Basel, 061 205 09 10, www.opferhilfe-beiderbasel.ch

## Talooyinka dadka saameeya Rabshadaha

Xogta qarsoodi ah. Waxaa macquul ah in loo baahdo turjumaan.

- Talooyinka dadka saameeya Rabshadaha Qoyska: La talinta khilaafaadka Qoyska, 061 267 00 26, www.bdm.bs.ch (DE)
- Latalinta talo ragga talo doonka ah: Xafiiska Ragga ee deegaanka Basel, 061 691 02 02, www.mbrb.ch (DE) Qiimaha talooyinka waxay ku xirantahay dhaqaalaha ay awoodi karaan dadka talo raadiska ah.

## Meelaha kale ee lala xariiraayo

Bogga Interneetka ee "Jooji Rabshada" (Halt Gewalt) ee kasoo horjeeda Rabshadaha Qoyska waxaa laga heli karaa xarumo kale oo dadka caawiya. Tusaale ahaan, su'aalaha la xiriira Ajaanibta, latalinta dadka qaba xanuunada Balwada, latalin sharciyeed ama Latalinta arimaha adag ee qoyska.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/xarumaha-laga-helo-caawimaada

# Waa maxay rabshadaha qoyska?

Rabshada qoyska (Häusliche Gewalt) waa xadgudubka ka dhex dhaca qoyska ama lamaanaha. Waxay dhaawacdaa jirka iyo dareenka qofka. Rabshada qoyska waxay leedahay noocyo kaladuwan. Rabshada qoyska waa ka mamnuuc dalka Swiserlaan.

## Waa maxay rabshada qoyska?

Rabshada qoyska waa xadgudubka ka dhex dhaca qoyska ama lamaanaha: Ee u dhaxeysa dadka reeraha leh ama dadka wada jooga ama wadi joogi jiray. Muhiim ma ahan inay isla nool yihiin. Xadgudubka ka dhex dhaca waalidiinta iyo carruurta ama u dhaxeeya dadka wada dhashay ee walaalaha ah sidoo kale waa rabshad qoys. Rabshada qoyska waxay keeni kartaa xanuun la xariira maskaxda iyo dhimirka. Rabshada qoyska sidoo kale waxay keentaa caqabadaha kobaca bulshada iyo caafimaadka carruurta. Sidoo kale Caruurta ku dhexnool Rabshadaha Qoyska si dadban ayay u saameynaysaa.

## Yaa saameyntu gaartay?

Rabshada qoyska qof walba waa ay saameyn kartaa: dadka yaryar iyo dadka waawayn, dadka haysta iyo dadka aan haysan baasaboorka Swiserlaan, dadka maalqabeenada ah iyo qoysaska danyarta ah. Dad badan oo kunool Swiserlaan waxay la kulmaan rabshada qoysaskooda ama lamaanahoodi hore. Waa muhiim in dhibanayaashu raadsadaan caawimaad.

## Noocyo kala duwan

Waxaa jira noocyo kaladuwan oo rabshada qoyska ah – mid jireed, mid maskaxeed, xadgudubka galmada iyo dhaqaalaha. Badanaa, noocyada rabshada qoyska waxay dhacaan waqti isku mid ah.
Tusaale ahaan: cayda joogtada ah, taabashada mamnuuca ah, xadgudubka, riixida, xakameynta, ku qasbida qof galmo, xoogida lacag, ka mannuucida qof inuu barto luuqad iyo dayacaada carruurta. Hanjabaadaha sidoo kale waxay kamid yihiin rabshada qoyska.

## Rabshadaha qoyska waa mamnuuc

Rabshada qoyska waa mamnuuc. Waxaa ka dhalan kara ganaax. Haddii boolisku oggaadaan rabshad qoys, waa inay sameeyaan baaritaan, xataa haddii qofka la kulmaaya xadgudubka uusan dooneyn in sidaas la sameeyo.

## Talooyinka Dhibanaha (Opferhilfe)

Xarumaha talada dhibanaha (Opferhilfe) waxay talo siiyaan waxna u sheegaan dadka la kulma rabshada qoysaskooda ama lamaanahoodii hore. Caawimaadaan waa bilaash. Dhibanayaashu waxay qorsheyn karaan tallaabooyinka xigga ayagoo adeegsanaaya khabiiro.
Howlwadeenada waa kuwo aan sii gudbin waxaad la wadaagto. Arrintaan waxay la micno tahay inaan qofka loo oggolaaneyn inuu la wadaago wada hadalka qofkale. Xataa booliska lalama wadaagaayo.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/waa-maxay-rabshadaha-qoyska

# Caawimaada loogu talagalay dadka rabshada geysta

Qof kasta oo qof kale jir ahaan ama dareen ahaan dhibaato u geysta waa inuu qaado masuuliyeeda uuna helo caawimaad. Siduu ku bedeli lahaa habdhaqankiisa waxaa lagu oggaan karaa kalfadhiyada la-talinta.

## Halkee ka heli karaa caawimaad?

Barnaamijka Waxbarashada ee ka dhanka ah Rabshada Qoyska waxaa lagu bartaa qaabka loo xalliyo dhibaatooyinka ayadoon la sameyn rabshad. Barnaamijka waxaa loogu talagalay dadka waawayn. Waxaa macquul ah in loo baahdo turjumaan. Waxaad iska diiwangelin kartaa lambarka 061 267 44 90 ama haeusliche-gewalt@jsd.bs.ch. Ka Qaybgalku waa lacag la'aan.
Meelaha kale aad kaheli karto caawimaada waxaa kamid ah:

- Talooyinka Khilaafaadka Rabshadaha Qoyska, 061 267 00 26, www.bdm.bs.ch (DE)
- Xafiiska Ragga ee Nawaaxiga Basel, 061 691 02 02, www.mbrb.ch (DE)
  Qiimaha talooyinkan waxay ku xirantahay hadba dhaqaalaha soo galo dadka talo raadiska ah.

Qof walba oo u baahan qof uu isla markiiba la hadlo wuxuu la xariiri karaa Qof Caawiya (Dargebotene Hand) asagoo kula xariiraya taleefoon, fariin qoraal ah, wada sheekeysi ama I-Meeyl. Mar walba waxaa jira qof diyaar ah. Xataa habbeenkii. Waxaa lala xiriiri karaa ayadoo magac la sheegin (qarinaaya magacooda).

- Dargebotene Hand (24/7), 143, www.143.ch

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/caawimaada-loogu-talagalay-dadka-rabshada-geysta

# Carruurta

Carruurta guriga kula kulma rabshadaha waxay u baahan yihiin caawimaad.

## Rabshadaha Qoyska waxay saameyn kuleeyihiin carruurta

Marka carruurta rabshada kala kulmaan guriga, waxay saameyn xun ku yeelataa kobacooda. Arrintaan waxay dhacdaa xataa haddii si toos ah carruurtu rabshada ula kulmin.
Qaar kamid ah carruurta waxay dhibaatada ula kulmaan si hoose, qaar kale waxay muujiyaan astaamo kaladuwan. Tusaale ahaan: dhibaatooyinka ka haysta dugsiga, isku kaadinta, madax wareer, hurdo la'aan iyo cunto xumi, dhibaatooyinka laxiriira la dhaqanka carruurta kale ama dagaal badan.

## Xarumahaan waxay caawiyaan carruurta

Xarunta Talada siiya dhibanaha (Opferhilfe) waxay carruurta iyo dhalinyarada siiyaan talo marka ay la kulmaan rabshadaha qoyska. Xog dheeraad ah oo ku saabsan Taageerad dhibanaha ayaa halkaan ka helaysaa.
Adeegga Carruurta iyo Dhalinyarada (Kinder- und Jugenddienst KJD) ee waaxda koriinka waxay ka taageertaa koriin caafimaad leh. Carruurta iyo dhalinyarada waxay caawimaad ka heli karaan halkaas, tusaale ahaan khilaafyada qoyska.

## Maxay Carruurtu sameyn karaan?

Carruurta rabshadaha kula kulma guriga waa muhiim inay la hadlaan qof ka baxsan qoyska. Tusaale ahaan: macalimiinta, shaqaalaha arimaha bulshada ee dugsiga, saaxiibada waalidka ama dariska.
Pro Juventute waxaa la wici karaa maalin iyo habbeen. Khabiiradoodu cidna uma sheegaan wada hadalka lala yeesho. Waxay dhageystaan oo ay caawiyaan dhibanayaasha si ay u helaan xal. Wicitaanada lala sameynaayo Pro Juventute waa bilaash. Dadka wicitaanka sameynaaya lagama doonaayo inay sheegaan magacooda. Pro Juventute sidoo kale waxaa lagula xariiri karaa fariin qoraal ah, hab wada sheekeysi ah ama iimayl.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/carruurta

# Xadgudubka galmada

Xadgudubyada galmada sidoo kale waxay ka dhex dhacaan lamaanayaasha (xataa kuwii hore) iyo qoyska. Xadgudubka galmada waa nooc kamid ah Rabshadaha Qoyska. Waxaa loo gudbin karaa booliska. Xataa haddii dhibanuhu uusan dooneyn in loo gudbiyo booliska: waa muhiim in la sameeyo baaritaan caafimaad xadgudubka kadib.

## Caawimaada caafimaadka

Dhaqtarka Haweenka ama Isbitaalka Jaamacada Basel Qeybta gargaarka degdega ah waxay dhibanayaasha ula tacaashaa qaab qarsoodi ah.

- Dhakhtarku cidna uma sheego.
- Xadgudub kasta waa la diiwaangeliyaa. Caddeymaha waxaa la keydiyaa 1 sano.
- Dukumiintiga waxaa la siin karaa booliska muddo kadib. Waa caddeyn muhiim ah.
- Dhakhtarku wuxuu xiriir la sameyn karaa adeegyada taageerada dhibanaha (Opferhilfe).

## Inta u dhaxeysa xadgudubka iyo baaritaanka

- Dhibanayaashu waa inaysan qubeysan ama is dhaqin - xataa waa inaysan dhaqin gacmahooda.
- Haddii ay macquul tahay, dhibanayaashu waa inaysan aadin musqul.
- Dhibanayaashu waa inay dharkooda keenaan baaritaanka (ayagoon dhaqin).

## Talada Sharciga iyo Dhimirka

Xarumaha caawiyo dhibanaha (Opferhilfe) waxay bixin karaan taageero maskaxeed. Waxay yaqaanaan jawaabaha su'aalo badan. Caawin ayaad ka helaysaa halkaan.

## U gudbinta Cabashada Booliska

Boolisku waxay khibrad u leeyihiin warbixinada la xariira Xadgudubka Galmada. Wareysiyada waxaa loo qaadaa qaab toos ah waxaana qofka la yeesha qof ay isku jinsi yihiin. Cabashada waxaa laga buuxsan karaa xarunta booliska. Qof uu ku kalsoonyahay ama khabiir ka socda hay'ada taageerada dhibanaha (Opferhilfe) ayaa la imaan kara dhibanaha.
Saacadaha ka baxsan kuwa shaqada, booliska waxaa laga wici karaa 117 ama 112. Dumarku sidoo kale halkaan ayay ku dhaafi karaan fariin. Gabar boolis ah ayaa qofka dib u wici karta.
Booliiska Gobolka qaybta arrimaha Bulshada waxay khibrad u leeyihiin tacadiyada galmada iyo rabshadaha Qoyska

- Booliska Gobolka qaybta arimaha bulshada waxaa laga wici karaa 061 267 70 38 (waqtiyada Xafiisyadu furanyihiin)

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/xadgudubka-galmada

# Xaquuqda deganaashaha

Waa muhiim inaad hesho talo gaar ah! Kala hadlida qof hay'ada taageerada siisa dhibanaha (Opferhilfe) ma keeneyso inuu qofku waayo xaquuqdiisa deganaashaha. Wada sheekeysigu waa qarsoodi. Hay'ada taageerada siisa dhibanaha (Opferhilfe) qofna uma sheegto waxa loo sheegay.

## Xaquuqda deganaanshaha haddii lammaanuhu ukala tagaan sababo la xariira rabshadaha qoyska

Haddii qofku yahay mid ku guursaday Swiserlaan uuna la kulmo rabshad qoys, qofkaan wuu sii joogi karaa Swiserlaan hadba xaaladiisa siday tahay xataa haddii ay kala tagaan lamaanihiis. Xaalad kasta mida kale way ka duwan tahay. Taasina waa sababta raadsashada talo ay muhiim u tahay.
Xarumaha talooyinka dhibanaha (Opferhilfe) waxay kaa caawin karaan: Khabiir ayaa sharaxaaya xaalada sharci ee hadda wuxuuna dhibanaha ka caawinaya talaaboyinka xiga. Taladu waa bilaash waana qarsoodi. Waxaa macquul ah in loo baahdo turjumaan.

## Diiwaangelinta rabshada

Waa muhiim in qofku haysto caddeyn muujinaysa Xadgudubka soo gaaray. Tusaale ahaan: sawirada dhaawacyada, sawirada hanjabaada ama xadgudubka ka dhaca WhatsApp ka, Facebookga, iwm. Caddeymaha waa in lagu kaydiyo meel ammaan ah. Tusaale ahaan, guriga saaxiib ama goobta shaqada.
Sidoo kale waa wax wanaagsan in lala socodsiiyo arrinta dadka u dhaw meesha xadgudubku dhacay. Tusaale ahaan, qof katirsan saaxibadaada kuu dhow, saaxiibada shaqada, dariska ama dugsiga.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/xaquuqda-deganaashaha

# Dandaansiga

Dandaansigu waa nooc kamid ah xadgudubka waana wax keena culeeys badan. Waa muhiim in laga hadlo lana helo talo.

## Waa maxay Dandaansi?

Dandaansigu waa in si saa'id ah qof isha loogu hayo, xiriir lala sameeyo, loona geysto xadgudub. Arrintaan waxaa qofka lagu sameeyaa asagoon raali ka ahayn. Dadka inta badan sameeya waa dadka dhibaatooyinka geysta (sida lamaanayaashii hore) laakiin sidoo kale qofka geysanaaya wuxuu noqon karaa qof aadan aqoon.
Tusaale ahaan: soo dirista fariimo qoraal ah oo badan, iimaylo iyo fariimo kale, tacadiyad ka dhacda shaqada ama guriga, argagax la isugu geysto taleefoon, hadiyado uusan qofku rabin iyo ka raadinta xog goobta qofka.
Dandaansigu wuxuu saameyn karaa caafimaadka dhibanaha iyo xaalada maskaxdiisa.

## Diiwaangelinta rabshada

Waa muhiim in la caddeeyo dandaansiga. Tusaale ahaan, dhibanuhu wuxuu qori karaa dhibaatada dandaansiga ee loo geysto (tusaale, hadiyadaha, qoraalada, wicitaanada taleefoonka), dhibanuhu wuxuu arrinta la socodsiin karaa dadka u dhaw (deriska, saaxiibada ama shirkada uu u shaqeeyo) wuxuuna qaadi karaa sawiro/caddeymo muujinaaya fariimaha (WhatsApp ka, Facebookga, iwm.).

## Raadsashada Taageero

Xarumaha taageera dhibanaha (Opferhilfe) waxay bixin karaan taageero. Khabiir ayaa caddeyn kara xaalada sharci wuxuuna dhibanaha ka caawin karaa tallaabada xiggta. Xafiiska Arimaha Bulshada (Sozialdienst) ee Booliska gobolka waxay u gaaryihiin daandaansiga. Dhibanayaasha waxay laxiriiri karaan Xafiiska Arimaha Bulshada.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/dandaansiga

# Guurka Qasabka ah iyo Gudniinka gabdhaha

Guurka Qasabka ah (Zwangsheirat) iyo Gudiniinka gabdhaha (Mädchenbeschneidung) waa ka mamnuuc Swiserlaan. Marka laga yimaado hay'adaha ku takhususay, Xarumaha talooyinka siiya dhibanahayaasha (Opferhilfe) ayaa sidoo kale bixin kara taageero.

## Waa maxay guurka qasabka ah?

Haddii qof u guursado cadaadis ka haysto qoyskisa darteed iyo isagoo uusan qofku raali ka ahayn, arrinataan waxaa loo yaqaan guur qasab ah. Guurka waxaa laga yaabaa in laga soo qaado midaan jirin. Dadka sidoo kale waxay xor u yihiin inay doortaan inay qofka lasii noolaadaan ama inay kala tagaan. Haddii qof uu sii qabo qof aan dooneyn, waxaa sidoo kale arintaas loo yaqaan guur qasab ah.
Tusaale ahaan qasbidda waxaa kamid ah: hanjabaada, cadaadiska, cadaadiska maskaxda ama xadgudub jir ahaaneed.
Guurka qasabka ah iyo Lamaanaha qasabka ah waa ka mamnuuc dalka Swiserlaan.

## Caawimaad

Waaxda Gaarka ah ee Qaranka "zwangsheirat.ch" waxay siisaa dhibanayaasha iyo khabiirada Talooyin qarsoodi iyo bilaash ah: lambarka khadka Caawinta 0800 800 007 ama iimaylka info@zwangsheirat.ch

## Waa maxay gudniinka gabdhaha?

Gudniinka gabdhaha waxaa qayb laga gooyaa xubinta taranka Haweenka. Waxaa jira noocyo kaladuwan iyo qaabab loo gooyo. Gabdho iyo dumar badan oo la guday waxay la dhibanyihiin caafimaad darro jireed iyo kuwa nafsaaani ah oo ay ka dhaxleen gudniinka.
Gudniinka gabdhaha waa mamnuuc. Waalidiintu sidoo kale waxaa ku dhici kara ganaax haddii ay ilmaha u diyaariyaan gudniin ay ku gudaan meel ka baxsan Swiserlaan.

## Caawimaad

Ururka ka dhanka ah gudniinka gabdhaha waxay macluumaad siiyaan lana xiriiraan dadka muhiimka ah. Kaaritaaska Swiserlaan waxay talo bilaash ah iyo qarsoodi ah siisaa dadka saameyntu soo gaartay: Waxaa lagala xiriiri karaa 042 419 23 55 / beratung@maedchenbeschneidung.ch
Xarumaha taageera dhibanaha (Opferhilfe) way caawin karaan.

**Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)**

www.hallo-baselstadt.ch/so/rabshadaha-qoyska/guurka-qasabka-ah-iyo-gudniinka-gabdhaha